



Doomis Magangalyo:
Macluumaadka Sharciga
asaasiga ah Ee loogu talo-galay
Codsadayasha Magangalyo
Caalami ah.

SOMALI



Buug-yarahani waa natiijo hanaan la taliyadeed oo leh koox ka shaqeysa caawinta xagga qareenada sharciiyeysan Ee fadhigoodu yahay Jaziiradda Lesfoos. Macluumaadka ku jira gebi ahaanba waa mid tilmaaman, guud ahaana soo koobaya bixinta sharci dejinta ugu muhiimsan Ee Magangalyo ahaan ku haboon wadanka Giriiga. Si kastaba ha ahaatee, waa mid aan dhamaystirneyn oo ku xiran/xidhan is bed bedel, ama fulino kala duwan ay Maamuladu u adeegsan karaan, taa micnaheeduna ma ahan inaad u fahamtid in qorayaasha qoraankaan iney masuul ka yihiin. Waxaa lagula talinayaa qof walba oo magangalyo doon u ah Jaziiradda Lesfoos inuu qareenkiisa (looyar-kiisa) u sheego, si uu u helo la talin shaqsi ahaaneed.

O/ Jilayaasha caawinaada xagga sharci-yaqaanada:

GCR (Greek Council for Refugees)

- Cinwaanka (Adreeska) Agiou therapondos 5, mytilene (Agiyuu theraboondos 5, mitiliini).
- Email: gcr-lesvos@gcr.gr
- Maalmaha shaqada: Isniinta illaa jimcaha 10:30-ka subax-nimo, illaa 12:30-ka duhur-nimo.

ELiL (European Lawyers in Lesbos)

- IICRC iyo BRF xafiiskoodu wuxuu ku yaalaa konteenarada la yiraahdo Olive Grove (Oliif goroo) ee Mooriya dhexdeeda ah.
- Kala xiriir/xidhiidh taleefan WhatsApp ah +306945051969
- Email: info@elil.eu
- Maalmaha Shaqada: Isniinta illaa jimcaha 9:00-ka subax-nimo, illaa 14:00-ka ma 2-da duhur-nimo, Mooriya.

HIAS (Hebrew Immigrant Aid Society)

- Cinwaankooda: P.kountouriotou 47, (kuntuuriyotuu 47) dabadha labaad (xagga sare ee loft kafe).
- Taleefan nambarkooda: 2251055488,
- Taleefan luqada carabiga ah +306944134335, ama kala xiriir/xidhiidh luqadaha kala ah Faarsii iyo Faransiis +306944134160, waadna kala hadli kartaa WhatsApp iyo Viber intaba.

DRC (Danish Refugee Council)

- Barta warbixinada ee loo yaqaano info point/RIC/ Mooriya: 12:30-ka duhur nimo, illaa 15:00-ka ama 3-da galab nimo.
- DRC: kooxda Balamaha ee xagga sharciga kuu soo qabanaysa, waxaad ka helayaa Info point, RIC/ Mooriya, Maalmaha shaqada Isniinta illaa jimcaha, 12:30-ka duhur nimo illaa 15:00-ka ama 3-da galab nimo.
- Kala xiriir/xidhiidh taleefan WhasApp ah +306948400494, Isniinta illaa jimcaha 9:00-ka Subax nimo illaa 17:00-ka ama 5-ta galab nimo

Xarunta Sharci-yaqaanada Ee Lesfoos.

Mosaik support center (Legal Centre Lesbos)

- Cinwaanka: Sappous 9 (Sabfuus 9)
- Magaalada Mitiliini
- Ka wac taleefan WhatsApp ah +306940198997
- Maalmaha Shaqada: Isniinta illaa jimcaha inta u dhaxaysa 10:00-ka Subax nimo illaa 14:00-ka ama 2-da duhur nimo.

1/ Qeexitaanka ilaalinta ama Sharci siinta caalamiga ah:

Labo nooc oo Sharci siin Caalami ah ayaa ka jira Wadanka Giriiga:

1. “Aqoonsiga Qaxootiga” - sida ku cad heshiiska Qaxootiga ee 1951, qaxooti waa “qof la soo kulmay cabsi ku sabsan jinsiyad, diin, dhalasho, xubinimada koox gaar ah ama fikrad siyaasadeed, isla markaana jooga meel ka baxsan dalka uu u dhashay, uusan awoodin ama, cabsida noocan oo kale ah aan rabin inuu shaqsiyad ahaan ka faa’iidaysto ilaalinta ama magangalyo siinta wadankaasi, ama sidoo kale Qaxooti waxaa la dhihi karaa qof aanan haysan wax dhalasho ama jinsiyad ah joogana meel ka baxsan wadankii hore ee caadi ahaan uu u deganaa aanan rabin inuu dib ugu laabto dhacdooyinka cabsida leh dartood. “

2. “Badbaadinta hoosaad”(Sharci siinta 2aad)– “Qofka u qalma Sharci siinta noocan micnaheedu waa qof heysta dhalaasho qaran saddexaad ama qof aan lahayn jinsiyad oo aan u qalmin qaxooti laakiin la tixraacayo sababaha aasaasiga ah ee muujinaya in uu qofka la rumaysan yahay in, haddii lagu celiyo dalkiisa/wadankeeda, ama haddii uu jiro qof aan wadan lahayn, waddankiisa/wadankeeda hore ee deganaansho rasmi ah, uu la kulmi doonaa khatar dhab ah oo uu qabo dhibaato halis ah oo aan awoodin, ama, sababtoo ah khatartaas oo kale, aan rabin inuu naftiisa faa’ido u helo ilaalinta/Magangalyada dalkaas. “

Waxaa jira nooc kale oo sharci siin ah oo laga yaabo inay dhici karto, haddii aan lagu aqoonsan magangalyo caalami ah - “Aqoonsiga bani’aadam-nimo” - kaas oo ah hal sano oo ogolaanshaha joogitaanka ee laga yaabo in Wasaaradda Arrimaha Gudaha ku siiso sababo ugaar ah bani’aadanimu awgeed, haddii codsigaaga la diido ka dib marxaladda racfaanka (ambiilka) iyo Guddiga racfaanka (ambiilka) kiiskaaga ama arintaada waxay u tixraacayaan ilaalin noocan ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato Magangalyo caalami ah wakhti kasta. Waxaad sheegan kartaa rabitaankaaga dalabka Magangalyada caalamiga ah markaad timaadid Lesvos. Illaa aad ka sheeganaysid rabitaankaaga ku aadan codsashada Magangalyada caalamiga ah, haddii kale waxaa laguugu celin karaa wadanka Turkiga.

2/ Waxaad leedahay xuquuqdaan iyo waajibaadkaan aasaasiga ah ee soo socda markaad Magangalyo Caalami ah codsatid:

Xuquuqda aad leedahay:

- Waxaad xaq u leedahay inaan dib lagugu ceelin Turkiga ilaa baaritaanka codsigaaga magangalyada laga dhammeenayo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad luqad aad fahmi karto ku hesho macluumaadka ku saabsan codsigaaga magangalyada, xuquuqda iyo waajibaadka.
- Xaq u lahaanshaha helitaanka gargaarka aasaasiga ah oo ay ku jiraan hoyga, cuntada, gargaar sharci, gargaar caafimaadka iyo kan nafsaaniga ah.
- Xaqa shaqada
- Xuquuqda caymiska bulshada
- Xuquuqda helitaanka waxbarashada (carruurtaada yar yar waxay aadi karaan Iskuulada waxbarashada).

Waajibaadka ku saran:

- Waajibka in lala shaqeeyo maamulka Giriiga

- Waajibka in lagu dhaqmo sharciga Giriiga
- Waajibka in aadan ka bixin Wadanka Giriiga ilaa baaritaanka codsigaaga
- magangalyada laga dhameenayo
- Waajibka in aadan ka bixin Lesvos haddii aad ku jirto xaddidaad juqraafi ama uu kaarkaagi xaddidanyahay.
- Waajibka inaad dib u cusboonaysiiso kaarkaaga magangalyada iyo inaad ka qayb gasho wareysigaaga magangalyo taariikhda lagu go’aamiyey.
- Waajibka in aad bixiso macluumaadka meelaha lagala galo soo xiriiri karo tani waa mid muhiim ah maadaama xafiisyada magangalyada ay si fudud ku gula soo xiriiri karaan, tusaale ahaan dib u dhigista wareysigaaga ama lagaaga codsanayo macluumaad dheeri ah marka loo eego codsigaaga magangalyo.

Xasuuso haddii aad jebiso mid ka mid ah waajibaadyadan, waxaad halis u tahay in lagu xiro iyo / ama in lagaa joojiyo codsigaaga magangalyadeed.

3/ Diiwaangelinta Booliska:

Booliska:

- Waxaad ka heli doontaa booliiska go’aan kugu amraya in aad sii joogtid Lesvos illaa heerka xiga ee nidaamka laga dhameenayo.
- Waxaad heli doontaa warqad booliis - hal ama laba bog oo ah warqad A4, ee uu sawirkaaga kaga dheganyahay dhinaca midig ee Warqadda, iyo faahfaahinta shakhsiga ee aasaasiga ah. Waxaa ka mid ah lambar oo arrimahaaga nidaamka magangalyada gaar kugu ahaan doono.
- Booliiska waxay faraha ka qaadi doonaan (kuwa ka weyn 14 sano) (nidaamka EURODAC).

Xusuusnow inaad siiso faahfaahinta shaqsiyeed ee run ah sida saxda ah (magaca, da’da, iyo wixi lamid eh) – dib kama baddali kartid faahfaahintaa haddii aadan haysan lafta aqoonsiga ee asalka ah ama baasaboora cadeynaya. Haddii aad rabto inaad codsato inaad bedesho mid ka mid ah faahfaahintaada shakhsiyadeed markaa, waa inaad booqataa Xafiiska Magangalyada Ee Giriiga oo aad Balan ka qabsato.

4/ Soo dhaweynta iyo qiimeynta caafimaad:

Baaritaan caafimaad oo bilaw ah ayaa la qaban doonaa, oo ay qabanayaan shaqaalaha caafimaadka.

Waxaa lagu siin doonaa kaar caafimaad - Warqad A4 ah oo sawir kaga dheganyahay dhinaca midigta sare, oo leh macluumaad caafimaad isku mid ah oo ayna ku qoranyihiin luqaha Giriiga iyo Ingiriiska.

Kalkaaliyaha caafimaadku wuxuu tilmaamayaa jilicsanaanta muuqata ee muuqaalka ah - xasuuso inaad kalkaaliyaha Caafimaad u sheegto:

- Wax yaalo nugulaasho oo laga yaabo inaysan muuqaal ahaan muuqan.
- haddii aad tahay dhibane xad gudub jinsiga la xariira loo geystay (gaar ahaan 72dii saac ee la soo dhaafay) ama aad tahay dhibane la soo jirdilay.

Haddii kalkaaliyahu uusan u arkin inaad Muuqaal ahaan nuglayn, waxaa lagu siin doonaa balan kale si aad u marto qiimeyn nuglaansho ah.

5/ Nuglaanta ama xaaladaha Khaaska:

Waxaa jira qaybo gaar ah “nugulaasho” hoos imaanaya sharciga Giriiga. Kuwani waa sida soo socota:

- Ilmaha aan lala socon
- Dadka naafanimada qaba ama qaba cudur aan la daweyn karin ama daran
- Dadka waayeelka ah (ka weyn 65 sano)
- Haweenka uurka leh ama dhawaan dhaley
- Waalidiinta keli ah ee haysta carruur yar yar
- Dhibbanayaasha jirdiil, kufsi ama noocyo kale oo khatar ah oo ku saabsan xad gudub nafsadeed, jir ahan, jinsi ahaan ama dhiig-miirasho, dadka qaba dhibaataada murugada ee masiibada kadib gaar ahaan kuwa ka badbaaday, iyo qaraabada dhibbanayaasha ah ee doomo ama maraakiib la burburtay.

Dhibbanayaasha dhib uu ka soo gaadhay dadka ka ganacsada bani-aadanka ama kuwooda wax tahriibiya.

Waxaad maraysaa qiimeynta nuglaanshaha:

- Qiimaynta Jirka - tani waxaa qorsheynaayo maamulka Giriiga
- Waxaa suurtoalka ah qiimeynta cilmu nafsiga - Haddii aad rabto inaad aragto dhaqtar cilminafsiyeed, hubso inaad dhakhtarka u sheegto inta lagu jiro qiimeyntaada jirka. Qiimeynta nafsaaniga waxaa qorsheyn doono maamulka Giriigga xilli kale.

Haddii qiimeyntaada nuglaanshaha ka dib lagu aqoonsado “qof nugul”, waxaad raaci doontaa nidaamka “joogtada ah”. Taas macnaheedu waa, gaar ahaan, in:

- Xaddidaadda Kaarkaaga lagaa saarayo, taasoo macnaheedu tahay inaad ka bixi kartid jaziiradda Lesvos.
- Codsigaada magangelyo waxaa lagu qiimeyn doonaa oo kaliya sababaha aad uga soo baxday wadankaaga iyo sababta aysan suurtagal u ahayn inaad ku noqoto wadankaaga - muhiim ma noqon doonto inaad muujiso inaadan Amni ku heli lahayn Turkiga ama inaad halkas ka heli weyday Magangalyo caalami ah.

Xasuuso in dhammaan macluumaadka aad sheegto inta lagu jiro qiimeyntaada nuglaanshaha iyo wareysiga magangelyada waa qarsoodi ama sir.

Xasuuso inaad u sheegto wax kasta oo nuglaansho hor leh, sida ugu dhakhsaha badan, uguna macquulsan. Si kastaba ha noqotee, haddii aadan shaaca ka qaadin dhibaatooyinkaaga inta lagu guda jiro qiimeyntaada nuglaanshaha, weli waad sii sheegi kartaa mar kale, iyo marka ugu muhiimsan, waxaad ku sheegi kartaa inta lagu jiro wareysigaaga magangelyada.

Xasuuso in nuglaanta aysan la mid ahayn helitaanka Sharci siin caalami ah. Sababta lagu aqoonsaday inaad tahay qof nugul micnaheedu maahan in si toos ah lagu siin doono Sharciga caalamiga ah, waana arin muhiim ah in aad ka soo qayb gasho, si buuxda-na ugu diyaar garoowdid, wareysigaaga magangelyada.

6/ Diiwaangelinta magangelyada:

Waqtigaan, waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto xafiiska magangelyada si aad u xarayso codsigaaga magangalyo doonka ah waxaad heli doontaa lambarka kiiskaaga magangelyada, kaarkaaga magangelyada iyo taariikhda waraysiga.

Farahaaga waxaa ka qaadi doona shaqaalaha xafiiska magangelyada ee Giriiga ama booliska Giriiga.

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad sheegto sababo kooban oo aad ugu soo baxdey waddankaaga ee aad ka soo jeedo.

Mideynta Qoysaska:

- Xasuuso inaad sheegto haddii qof ka tirsan qoyskaaga meelo kale oo Yurub ah aad ku leedahay oo aad jeceshahay inaad dib ula midowdo - sida. ninkaaga / xaaskaada, caruurta yar yar ama xubin qoyskaaga ah oo kugu tiirsan. Aad bay muhiim u tahay inaad tan sameyso inta lagu jiro diiwaangelintaada magangalyada, ama sida ugu dhakhsiyaha badan ka dib, si aad uga fogaato daahitaan kasta.
- Gudbi Warqad kasta oo cadeynaysa degenaanshaha qof ka mid ah qoyskaaga waddanka kale (sida ruqsadda degenaanshaha, caddaynta cinwaanka) iyo dhammaan Warqadaha caddaynaya xiriirka qoyska.
- Xasuusnow inaad saxiixdo ogolaansho qoraal ah oo aad ku codsanaysid inaad la midowdo qofka qoyskaaga ka mid ah, Sheegitaanka rabitaankaaga ee ah inaad dib ula midowdo qofka qoyskaaga ka mid ka ah inta lagu guda jiro diiwaangelinta Magangalyo keliya kuma filna.
- Codsiga dib-u-mideynta qoyska (sida waafaqsan ogolaanshaha qoraalka ah) waa in lagu sameeyaa saddex bilood gudahood laga bilaabo diiwaangelinta magangelyadaada, hadii qofka qoyskaaga ah aysan joogin Wadanka Jarmalka - taas oo ah codsiga dib u mideynta waa in la sameeyaa 3 bilood gudahood markaad timaaddo Jaziiradda Lesvos.

Xasuuso inaad keento nuqulo ama warqad kasta iyadoo leh magacaaga saxda ah, faahfaahinta shakhsiyeed, iyo wixi lamid ah, si loo hubiyo in faahfaahintaada si sax ah loo diiwaan galiyey.

Dhamaan Warqadahaaga shakhsiyadeed waa laguu soo celin doonaa, hase yeeshee haddii aad haysatid baasaboor, tan Maamulka ayaa kaasii hayn doona.

Xusuusnow inaad siiso faahfaahinta shaqsiyeed oo run ah ee na saxda ah sida (magaca, da’da, iyo wixi lamid eh) – dib kama baddali kartid faahfaahintaada haddi adan haysan lafta aqoonsiga ee asalka ah ama baasaboor cadeynaya.

Xusuusnow inaad si taxaddar leh u dhageysatid inta lagu guda jiro dib u akhrinta dhammaadka diiwaangelintaada (tusaale ahaan ka hor intaadan xaqiijin macluumaadka adiga oo saxiixaya foomka diiwaangelinta), una sheeg qofka ku diiwaangelinaya haddii ay jiraan wax qalad ah.

7/ Wareysiga magangelyada:

Wareysiga:

- Taariikhda wareysigaaga wuxu ku xusanyahay ama ku qoranyahay kaarkaaga magangelyada.
- Wareysiga laguma qaban-doono Moria - waxuu ka dhici doona Pagani bas ayaana lagaaga kaxeyn doonaa Moria.
- Xasuuso inaad keentid dhammaan Warqadahaaga caafimaadka ee aad heysatid iyo inaad sheegtid dhammaan dhibaatooyinka caafimaad ee ku heystaa Maalintaa iyo maalmihii hore ee la soo dhaafay intaba, Ogow waxaad maalintaa fursad u heysataa inaad wax kasta oo nugul sheegatid, Sidoo kale waxaa muhiim ah inaad bixiso sharaxaad buuxda.
- Xasuuso inaad u sheegto qofka kiiskaaga u xilsaaran ama ku waraysanaya haddii aadan soomarin qiimaynta nuglaanshaha/xaaladda qaaska ah.
- Xasuuso inaad u sheegto qofka kiiskaaga u xilsaaran haddii aad leedahay qiimeyn nafaani ah oo soo socota ama nooc kasta oo balan caafimaad ah, tusi warqad sax ah haddii la heli karo ee aad heysatid.
- Xusuusnow in tani ay tahay fursadaada kaliya ee aad ku sheegeyso sheekadaada - hubso inaad soo bandhigto wax walba oo aad hubiso inaad bixiso caddaymo la

xidhiidha codsigaaga, sida caadiga ah caddaynta asalka ah, Warqad daabacan (tusaale ahaan, sawirrada, qoral facebook, maqaallo wargeys, aqoonsi xirfadeed (tusaale ahaan, haddii aad sababta ugu soo carartey wadankaaga uu la xiriiray xirfaddaada shaqo), waraaqo / hanjabaado). Waxaa kale oo aad soo gudbin kartaa caddeyn dheeraad ah wareysiga ka dib. Waqtiga kama dambaysta ah ee soo gudbinta caddeynta dheeraadka ah waa 5 cisho ka dib wareysiga, lakiin waa laga yaaba ina lagaa aqbalo haddii waqtigan ka dib la soo gudbiyo

Waxaa lagu weydiin doonaa:

- faahfaahintaada shakhsi ahaaneed
- Dhibaatooyinka caafimaadka / nuglaanta
- Iyada ee ku xiran tahay jinsiyadaada iyo xaaladdaada nuglaansho ahaaneed, waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo haddii dalka Turkiga kuu yahay wadan nabad ah iyo haddii aad halkas ka heli karto Magangelyo caalami ah
- Sababaha aad ugu soo baxdey dalkaaga iyo sababta aysan suurtagal ahayn inaad ku noqoto wadankaaga - tusaale ahaan. Maxay tahay sababta aad ugu soo baxday iyo waxa kugu dhici doona haddii aad dib u noqotid? Sidoo kale ma jirtaa meel kale oo amaan ah ee Wadankaaga ka mid ah?

Waxaad leedahay xuquuqyadaan soo socda:

- Xaq u yeelashada garyaqaanka (looyarka) inuu kuu raaco wareysigaaga
- Inaad xaq u hesho wakhti aad isku diyaariso waraysigaaga - waxaad heli kartaa maalin buuxda oo aad ku diyaargarowdo haddii aadan ahayn qof nugul, iyo ugu yaraan toddoba maalmood haddii aad tahay qof nugul. Tani waxay si gaar ah u khuseysaa haddii wareysigaaga la soo gudbiyo/ hormariyo ama wareysigaaga lagu qorsheeyey ogeysiis gaaban.
- Xaq ayaad u leedahay inaad weydiisato turjubaan kale haddii aad ka walwalsan tahay tayada turjubaanka.
- Xaq ayaad u leedahay inaad dooratid jinsiga turjubaanka iyo qofka ka qadaayo wareysiga, sida (Gabar ama Wiil).
- Xaq ayaad u leedahay inaad doorato inaad wareysigaaga ku gasho afkaaga hooyo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad weydiisato dib u dhigis (haddii aadan codsanin dib u dhigid ka hor, tan si toos ah ayaa lagu siin doonaa.) Haddii aad dib u dhigatay wareysigaaga ka hor, waxaad weli codsan kartaa dib u dhigis kale haddii aad haysato sababo macquul ah (tusaale, arrimaha caafimaadka khatarta ah macnaheedu waa inaadan ka soo qeybgeli-karin wareysigaaga - xaaladaha noocaas ah, caddaymo ayey ubaahanyihiin (sida warqad caafimaad) waa mid ku caawineysa)).
- Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato nasasho inta uu socdo Wareysiga.
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato qoraal ahaan waraysigaaga ama isagoo duuban.

Waxaa ku saaran waajibaadkaan soo socda:

- Waxaa waajib kugu ah inaad soo xaadirtid waraysigaaga, haddii aad kamaqanaatid wareysigaaga, kiiskaaga waa la xirayaa oo, hadaadan soo bandhigin sababo macquul ah oo aad uga maqneyd wareysigaaga, way adkaan kartaa inaad dib u furato kiiskaaga.

8/ Racfaan:

Macluumaadka:

- Wareysigaaga magangelyadaddii ka dib hadi codsigaaga magangelyada la diido, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan (ambiil) ka qaadato.
- Haddii lagu qiimeeyey sida qof nugul, waa inaad u soo gudbisaa arjiga racfaanka 30 cisho gudahood

markaad hesho go’aankaaga. Haddii aanan laguugu qiimeeyneynin markaagii hore sida qof nugul, waa inaad ku soo gud-bisaa 5 maalmood gudahooda.

- Racfaanku (ambilka) waa nidaam qoran. Qoraalka racfaanka (codsiga ambiilka) ayaa loo gudbin doonaa, Guddiga Racfaanka (ambiilka) ee xafiiskoodu yahay Magaalada Atanis oo fiirin doona. Haddii aysan si gaar ah oo kuagu yeerin Guddiga, ma jiri doonto wareysi dheeraad ah loomana baahnaan-doono inaad goobta joogtid.

Xuquuqda:

- Xaq u lahaanshaha gargaar sharciyadeed oo Dowladda aad ka helaysid iyo garyaqaan (Qareen) oo Giriig ah oo bilaash (lacag la’aan) si uu u qoro warqad xasuuseed racfaan (ambil). Qoraalkan waa in lagu daraa doodo ku saabsan sababta ay tahay in lagu aqoonsado Magangelyo caalami ah waana in la xareeyo 2 maalmood ka hor baaritaanka racfaanka (ambilka). Markaad soo gudbiso racfaankaaga, waxaad u sheegtaa shaqalaha rasmiga ah ee Xafiiska magangelyada Giriiga inaad rabto gargaar sharci.
- Xaq ayaad u leedahay inaad waydiisato dib u dhigista racfaanka, haddii aan laguu ogolaan wakiil sharci-yaqaan ah (si kastaba ha ahaatee, Guddiga Racfaanku qasab kuma aha inuu aqbalo codsigaaga dib u dhigista ee dhacdadaan ah, racfaankaagu wuu sii socon karaa xiitaa haddii aanan laguu ogolaanin wakiil sharci-yaqaan ah).

Xusuusnow:

- In aad keento xafiiska Magangelyada ama garyaqaanka (Qareenka) wixii warqado caafimaad ah ee aad haysato, gaar ahaan kuwa lagu siiyay wareysigaaga/ go’aankaaga ka dib.
- In aad u keento garyaqaanka (Qareenka) Warqad kasta oo la xariira dacwadaada waqti fiican taariikhda racfaankaaga ka hor.

9/ Haddii racfaankaaga (ambilkaaga) la diido:

Haddii rafcaankaaga (ambiilkaaga) la diido waa lagu xiri karaa laguna celin karaa Wadanka Turkiga ama lagu masaafurin karaa wadankaaga hooyo, iyadoo ku xiran haddii laguu qiimeeyey mid nugul ama aanan nuglayn.

Fursadaha sharci (wixii sharci ah oo kuu banaan)- la xiriir garyaqaanka (Qareen) si qiimeyn shakhsiyeed loogu sameeyo kiiskaaga:

- Nidaamka Garsoorka - 60 maalmood gudahood laga bilaabo helitaanka diidmadaada rafcaanka (ambiilka), waxaad xaq u leedahay inaad soo xareyso codsi ka saarid ka hor maxkamadaha maamulka Giriigga, adigoo adeegsanaya taageerada sharciga ah ee NGO-yada (awood xadidan, bixinta kharashka maamulka) ama taageero sharci oo garyaqaan (Qareen) gaar (lacag-na) ah. Waxaa jira qiimo la xidhiidha dooqa labaad - waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto garyaqaanka (Qareenka) si aad u weydiiso arrintan.
- Codsiga magangalyada ku xiga - 60 maalmood ka dib oo laga bilaabo helitaanka diidmada rafcaanka (ambilka), waxaad xaq u leedahay inaad soo xareyso codsi magangelyo oo xiga (oo labaad). Tani waxaa la tixgelin doonaa oo kaliya haddii ay jiraan waxyaabo cusub oo muhiim ah oo ku saabsan codsigaaga (sida macluumaad cusub oo ku saabsan gobolka ama wadankaaga hooyo ama gurigaagii hore, sababo cusub oo sheegasho ah, waraaqo caafimaad oo cusub oo la xariira codsiga (tusaale ahaan shahaado muujinaysa inaad tahay dhibbane jir-dil loo geystay).